

# Sida loo dalbado taageerada Qaybta 4 haddii aad uur leedahay



Oktoobar 2010

Somali

Qaybta 4 waa taageero muddo gaaban oo uu bixiyo Xafiiska Arrimaha Gudaha haddii dalabkaaga magangalyo-doon la diido, codsigaagiina uu guul darraysto. Haddii aanad awoodin inaad kaga baxdo UK si dhakhso ah oo aad guri aad gasho iyo lacag aad cunto ku iibsato midna aanad haysan (markaas caydh ayaad tahay), waxaad xaq u yeelan kartaa taageerada Qaybta 4 inta aad uurka leedahay.

Si kastaba, si aad u dalbato taageerada Qaybta 4 iyadoo lagu salaynayo uurka aad leedahay, Xafiiska Arrimaha Guduhu wuxuu kaaga baahan inaad keento dokumentiska soo socda oo **dhan**. Markaad soo ururiso macluumaadka hoos ku qoran dib ugu soo noqo xafiiskayaga Scottish Refugee Council waxaanannu kuu qaban doonaa ballan Qaybta 4.

## Dokumentiska aad u baahan tahay waxa ka mida:

1. Shahaadada AMATB1 ee dhakhtarkaaga (GP) **ama** umulisadaada ka socota oo tusinaysa inaad ugu yaraan 32 toddobaad uur leedahay. Haddaanad wali la kulmin umuliso, waxaanu kuu qabanqaabin karnaa ballan;
2. Liiska qoran ee ciwaanada meelihii aad ku noolayd intii aad soo gashay UK. Liisku waa inuu u yaalaa siday u kala horreeyeen oo ka bilaabmaysa ciwaankaagii u dambeeyey ilaa ciwaankii u horeeyey intaad ku noolayd UK. Ku dar magacyadii dadkii aad la joogtay iyo, hadday suurawdo, waraaqo ka socda iyaga oo sheegaya markaad la noolayd iyaga iyo sababta ay taageeriddaada u sii wadi waayeen. Tani gaar ahaan waa muhiim sannadkii u dambeeyey dalabkaaga kahor. Sidoo kale haddaad bixin karto waraaqo kugu socday markaad ciwaanadan lahayd, waxay caawin doonaan dalabkaaga Qaybta 4;

3. Liiska qoran ee meelihii aad ka shaqaysay oo dhan ilaa intaad soo gashay UK, ooy ku jiraan waraaqihii lacag bixinta iyo foomamka P45, ee lagu siiyey makaad shaqo dhammayso, haddaad hayso. Haddaad uga shaqaysatay UK si aan sharci ahayn, saamayn xun ku yeelan mayso dalabkaaga Qaybta 4 ilaa iyo inta aad hadda joojisay shaqada;
4. tafaasiisha xisaab bangi kasta ood ku lahayd UK, ooy ku jiraan bayaanada bangiga ee lixdii bilood ee ugu dambeeyey; **iyo**
5. haddaad wali xidhiidh la leedahay ilmahaaga aabihii, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso ciwaanada, tafaasiisha shaqada iyo bayaanada bangiga ee isaga ka socda iyo sidoo kale bayaan qoraala oo sheegaya sababta uu u taageeri waayay adiga iyo ilmaha.

**Muhiim ah:** waraaqaha aad bixisaa waa inay noqdaan af Ingiriisi. Si kastaba, haddii qofka bixinaya waraaquhu Ingiriisiga aanu qori karin, waxaan soojeedinaynaa inuu kuu soo raaco ballanta aad nala leedahay markaas waan ka caawin karnaa inuu warqad kuu qoro.

Liisaska ciwaanada iyo goobaha shaqada warqadda lagu magacaabay waxa lagu qori karaa luuqaddaada haddaanad awoodin inaad ku qorto Ingiriisi.